

Dhamaystirka Codsiga/ Taageerida Codsiga:

Codsiga Arbeitslosengeld II waxaa mar walba loo arkaa mid dhib badan. Foomamka codsiga waxay gaar ahaan dhib ku keenaan dadka asal ahaan Ajnabi kasoojeeda ama ay Luqada ku adagtahay.

Wasaarada Shaqada(Bundes Agentur für Arbeit) waxay habka Elektrroonikada ah ee Internetka kaaga caawinaysaa sida loo buuxiyo codsiga. Habka loo buuxiyo codsiga waxaad ka helaysaa hadii aad riixdo [Bogaan\(Link\)](#). Intaas waxaa sii dheer, kasakow, Tilmaamaha sida loo buuxiyo Codsiga Arbeitslosengeld II oo [Bogaan\(Link\)](#) diyaar kuugu ah, waraaqo ka hadlaya SGBII oo ku qoran luqado kala duwan.

Marka ay dadka ajaanibka ah ka codsanayaan Arbeitslosengeld II Jobcenterka Darmstadt, waxay haystaan fursad ay Luqadooda ooga cawiyaan Shaqaalaha Taageerida Codsiga. Iskaashi dhexmaray Xafiiska Interkulturellen Büro ee Wissenschaftsstadt Darmstadt, Laanqayrta Cas(Deutsches Roten Kreuz) iyo Jobcenterka Darmstadt, waxaa lagu curiyay Qorshe ay dadka ajaanibka ah ku helayaan caawimaad iyo kalsooni lacag la aan ah, marka ay codsiga samaynayaan. Kartida Luqadeed iyo Dhaqan ee ay leeyihiin Shaqaalaha waxay suurta gelisay isfaham sahlan.

Shaqaalaha dhamaystirka Codsiga waxaad ka helaysaa Qolka 18 ee Jobcenterka Darmstadt. Hayadaan adeega ah waxaad ka heli kartaa teleefoonka nambarkiisu yahay 06151/42854308, waxaadna ka dalban kartaa ballanta aad u baahantahay.

Luqadaha iyo Sacadaha wadhadlka waxaad ka arki kartaa warqadaan hoose:



Waqtiyar kadib waxaad halkaan ka arkaysaa warbixintaan oo luqado kale ku qoran